Digniinta Macaamiisha: U Baahnaan Degdeg ah oo Milkiilayaasha-guri ee U Qalma inay Codsadaan Hadda Gargaarka Morgijka Guryaha si ay Isaga Ilaaliyaan Kumanaanta La Wareegida Guryaha Minnesota ee Suurtagalka ah

Desember 30, 2020

Waa in Loo Siidaayo si Degdeg ah

Waaxda Ganacsiga ee Minnesota iyo Guriyeynta Minnesota (Minnesota Housing) waxay u digayaan milkiilayaasha-guri ee haysta morgijka guryaha oo uu federaalka taageeray iyo la kulmaya dhibaatooyin dhaqaale inay codsadaan hadda gargaarka morgijka guryaha si ay isaga ilaaliyaan la wareegida guryaha

Muddada kama dambaysta ah ee codsiyada gargaarka morgijka guryaha ee moorgijyada qaarkood waxaa loo kordhiyay illaa iyo Febraayo 28, 2021, laakiin milkiilayaasha-guri ee laga yaabo inay u qalmaan waa inay bilaabaan hadda hawlgalka codsiga. Wac bixiyahaaga amahda ama adeegahaaga morgijka guryaha isla markiiba si aad u go'aamiso haddii aad u-qalanto caawintan. Waxaad ka heli kartaa maanta la-taliye milkiilenimo-guri ee kuu dhaw ee bixiya adeegyo lacag la'aan ah si uu kuu caawiyo.

Gudaha Minnesota, waxaa jira qiyaastii 120,000 qoys, ama qiyaastii boqolkiiba 15 morgijyo, oo uu taageeray Maamulka Guriyeynta ee Federaalka (Federal Housing Administration (FHA)). Gudaha Minnesota, qiyaastii 13,000 oo milkiilayaasha-guri ee reer Minnesota, ama in ka badan tobankiiba hal, waxay haystaan morgijyada ay taageerto FHA oo ganaax leh, taas oo micnaheedu tahay kumanaan milkiilayaal-guri ee reer Minnesota ayaa ka daahay bixinta morgijyada guryaha oo saameyn ku yeelan kara muddada kama dambaysta ah ee lagu codsanayo gargaarka morgijka guryaha.

"Deyn-Qaatayaasha la kulma dhibaatooyin oo aan karin bixinta amaahda morgijkooda waa inay si ka hortagid ah ula xiriiraan deyn-bixiyayaashooda si ay u eegaan khiyaarada ay haystaan. Xaaladdo badan, khiyaarada deyn-qaataha way fiican yihiin ka hor inta ay amaahdu noqon mid ganaax leh, ama si xun u leh ganaax," ayey tiri Guddoomiyada Ku-meelgaarka ah ee Ganacsiga Grace Arnold.

Sharciga CARES ee uu meel mariyey Koongareeska bilaawgii sannadkan waxaa ka mid ahaa bixinta caawimaad loogu talagalay milkiileyaasha-guri ee saameyn ku yeeshay dhibaatooyinka dhaqaale ee COVID-19. Sharciga CARES wuxuu uga baahan yahay wakaaladaha federaalka inay u oggolaadaan milkiileyaasha-guri ee haysta amaahda ay taageertay dowladda federaalka in ay dib u dhigaan bixinta lacagaha morgijka guryaha, iyada oo aysan ganaax ama dulsaar lahaanin, 6 illaa 12 bilood, haddii milkiileyaasha-guri ay muujiyaan in awoodooda lacag bixinta ay saameyn ku yeelatay hoos u dhaca dhaqaale ee uu sababay cudurkan faafa.

Haddii uu milkiile-guri uusan awoodin inuu bixiyo lacagaha morgijka guriga, laakiin uusan hubin in uu u-qalmo gargaarka CARES, waa inuu la xiriiraa wali deyn bixiyehooda ama adeegahooda moorgijka si ay ugala hadlaan ikhtiyaarada.

Milkiileyaasha-guri ee haysta morgijyada ay taageertay dowladda federaalka waxay wax badan ka baran karaan ee ah gargaarka morgijka guryaha, sida ay ugu qalmaan iyo sida loo codsado caawinta morgijka guryaha Hagaha Gargaarka Macaamiisha [PDF]. Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan gargaarka morgijka guryaha, eeg digniintan macaamiisha Ganacsiga laga bilaabo Maajo 19, 2020.

- Noocyada amaahda ee ay taageerto dawladda federaalka sidaa darteedna u baahan in la bixiyo gargaar waxaa ka mid ah:
- Amaahda caadiga ah ee ay iibsadeen ama ay amniyeen Fannie Mae iyo Freddie Mac
- Maamulka Guriyeynta Federaalka (Federal Housing Administration (FHA)), oo ay ku jiraan Home Equity Conversion Mortgage (HECM)
- Waaxda Mareykanka ee Arimaha Ciidan-Ka-tirsanayaashii-hore (VA)
- Amaahda Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA) ee Horumarinta Miyiga (Rural Development (RD)), oo ay ku jiraan amaahda tooska ah iyo dammaanad qaadka leh

Haddii aadan haysan amaahda ay dowladda federaalka taageertay, waxaa laga yaabaa inaad weli u-qalanto caawin. Kala xiriir deyn bixiyehaaga ama adeegahaaga morgijka guryaha wixii macluumaad dheeraad ah. Ogsoonoow in dhammaan amaahda ay taageertay dowladda federaalka aysan hadda ku xirnayn muddada kama dambaysta ah ee la sheegay ee Febraayo 28, 2021.

Haddii aad qabto su'aal, kala xiriir Xarunta Milkiilenimo-guri ee Minnesota (Minnesota Homeownership Center) Lambarka 651-659-9336 si aad ula hadasho la-taliye milkiilenimo-guri oo aan faa'iido doon ahayn kaasoo kaa caawin kara inaad xaaladdaada ogaato. Adeegyada waa lacag la'aan. Maanta raadi la-taliye milkiilenimo-guri ee kuu dhow si aad u hesho caawimaadda aad u baahan tahay.

Waanu Kula Jirnaa/Kula Soconaa Maalin Walba: Waaxda Ganacsiga ee Minnesota

Meel kasta ee Minnesota oo aad ku sugan tahay, Waaxda Ganacsiga way kula jirtaa/kula socotaa maalin walba. Haddii ay tahay marka aad buuxsaneyso bansiinka/gaaska, iibsaneyso guri, ka shaqeynaysid yareynta isticmaalka tamarta ama wax dib u dhisaysid musiibad dhacdo ka dib — waanu kula jirnaa/kula soconaa, sidey ahaataba.

Waaxda Ganacsiga ee Minnesota waxay maamusha in ka badan 20 shirkadaha la xakameeyay, iyadoo hubinaysa in ganacsiyada Minnesota ay xoogan yihiin iyo in macaamiisha Minnesota la ilaaliyo. Hadafkeenu/Himadeenu waa inaan ilaalino danaha dadweynaha, u doodno macaamiisha Minnesota, hubino goob-suuqeed ee xoogan, tartan iyo cadaalad leh, xoojino mustaqbalka dhaqaalaha gobolka oo aan ugugu adeegno si ah ilo/kheyraad dadweyne oo lagu kalsoon yahay macaamiisha iyo ganacsiyada. Ka baro wax dheeraad ah mn.gov/commerce

Guriyeynta Minnesota

Guriyeynta Minnesota waa wakaaladda maalgelinta guryaha ee gobolka. In ka badan 45 sano, waxaan ka shaqeynay in aan bixino helitaanka guriyeyn la awoodi karo oo ammaan ah, oo wanaagsan iyo in aan ka dhisno bulshooyin sii xoogan gobolka oo dhan. Sannadkii 2019, waxaan sameenay maalgelin ah $ 1.42 bilyan oo waxaan caawinay in ka badan 68,900 qoys. Wax dheeraad ah ka baro mnhousing.gov.

XIRIIRKA WARBAAHINTA:

Waaxda Ganacsiga ee Minnesota (Minnesota Department of Commerce) Mo Schriner, Agaasimaha Isgaarsiinta, mo.schriner@state.mn.us 651-363-1227